

# WAXGARADKA BEESHA SADE

Ku: Ra'iisulwasaaraha Xukuumadda Jam. Federaalka Soomaaliya

Ku: Ergayga Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay

Ku: Wakiilka Midowga Afrika

Ku: Wakiilka Urur-Goboleedka IGAD

Ku: Dhammaan Waddammada Daneeyaa Arrimaha Soomaaliya

Og. Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Og. Guddoomiyaha Golaha Shacabka Qaranka

Tr. 23/02/2016

## Ujeeddo: War Saxaafadeed

Waxaa in muddo ah socday dedaal lagu doonayey, in wax looga qabto khilaafka u dhaxeeyaa Maamulka Jubba iyo dhinacyada ka soo horjeeda mid ka mid ah oo ah Mucaaradka u dhashay Beesha Sade. Waxaa magaalada Muqdisho ku kulmay xubno matalayey Mucaaradka iyo Hoggaamiyaha ku-meel-gaarka ah ee Maamulka Jubba Axmed Maxamed Islaan. Waxaa Kulanka la isku afgartay, lana waqtiveey, in wada-xaajood la isugu yimaado magaalada Kismaayo.

Kaddib markii uu dhicisoobay Kulankii lagu balamay; waxaa la qabtay saddex ballan oo kale oo uu ugu dambeeyey mid ku muddeysnaa 10/2/2016ka. Waxaa dhammaan Ballamdaas baajiyey oo ay dhinaciisa ka fuli waayeen Hoggaamiyaha Maamulka Jubba.

Waxaa wax laga xumaado ah, in Axmed Maxamed, isaga oo ka meermeeraya dhinaca khilaafku kala dhaxeeyo uu inta isu keenay dad Beesha Sade u dhashy ee Kismaayo ku sugnaa uu halkaas uga dhawaaqay, in uu magaalada Kismaayo Shir Dib-u-heshiisiin uga furay Beesha Sade; taas oo uu uga dan leeyahay marin-habaabin uu ku knaldayo ra'yul-caamka.

Waxaan aamminsanhay, in wadahadal iyo heshiis uu yahay waddada ugu habboon ee lagu gaari karo, in la helo maamul ay dadka Gobollada Jubba wada leeyihiin, ayna wada daafacdaan; kaas oo gaarsiin karaya nabadda iyo horumarka ay u baahasn yihiin.

Haddaba, waxaan ugu baaqaynaa Dowladda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, guud ahaan beesha Caalamka, gaar ahaan waddammada daneeyaa arrimaha Soomaaliya, in dadweynaha Gobollada Jubba aan loo afduubin koox iyo shakhiyaad gaar ah.

Waxaan ka digaynaa, in laga hortago, gacanna aan la siin waxyaabaha dadweynaha Gobollada Jubba dib ugu celin karaya colaadii iyo dagaalkii sokeeye ee ay muddada dheer ku soo jireen.